# 2020-21 Su'aalaha Badanaa La Iska Weydiiyo Xog-ururinta Dugsigyada Guulaystay ee PPS

**Waa Maxay Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystayhat?**
Xog-ururinta Dugsiyada Guulaysta waa xog-ururinta cimilada iyo jawaab-celinta dugsiyada degmadayada oo dhan oo sannadle ah. Xog-ururinahan waxa ay siiyaan ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo hoggaamiyayaasha fursad ay jawaab celin kaga bixiyaan cimilada dugsigooga iyo khibradahooga marka ay joogaan dugsiga.

**Ayo ayaa xog-ururinta laga qaadi doonaa?**
Sanadkan ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha ayaa xog-ururin laga qaadi doonaa. Arday kasta oo ku jira fasallada 3 illaa 12 waxa fursad loo siin doonaa in uu qaato xog-ururintan. Dhammaan qoysaska ku sugan Degmada waxa ay fursad u heli doonaan inay qaataan xog-ururin iyada oo aan loo eegayn heerka fasalka ardaygooga. Xog-ururintu waxa ay diyaar ku noqon doontaa Ingiriisi, Isbaanish, Raashiyaan, Soomaali, Fiitnaamiis, iyo Jayniis. Xog-ururinta hoggaaminta dugsiga waxa sidoo kale la siin doonaa hoggaamiyayaasha dhismaha.

**Sidee baa uu kani kaga duwan yahay xog-ururinaha kale ee PPS?**
Waxa jira xog-ururino degmada oo dhan ah oo badan kuwaas oo qabta ujeeddooyin kala duwan. Xog-ururinta Dugsiyada Guulaysta waxa ay siiyaan ardayda iyo qoysaska fursad ay ku wadaagaan jawaab-celintooda ku saabsan deegaanka dugsigooga, deegaankooga waxbarasho, iyo badbaadadooda marka ay joogaan dugsiga. Uma hayno wax xog-ururino oo kale oo qabta ujeeddadan. Su'aalaha ku jira xog-ururinada shaqaalaha iyo hoggaanka waxa uu waafaqi doonaa su'aalaha ardayga iyo qoyska.

**Maxaa lagaga hadli doonaa?**
Ardayda, mawduucyada la dabooli doonaa waxa weeyi: xidhiidhana macallinka-ardayga, dareen kamid ahaansho, badbaadada dugsiga, cimilada dugsiga, ka qaybqaadashada, baraarugsanaanta dhaqan, iyo kala duwanaanshaha iyo ka mid ahaanshaha. Qoysaska mawduucyada ku jira waxa kamid noqon doona: hagaagsanaanta dugsiga, cimilada dugsiga, caqabadaha ka qaybqaadashada, iyo badbaadada dugsiga. Xog-ururinta SEL waxa ay cabbiri doontaa: Dhiirranaanta, caqliyadda koritaanka, isku filnaanta, is maamulka, baraarugsanaanta bulsheed iyo xakamaynta dareen. Xog-ururinada shaqaalaha iyo hogaamiyaha dugsigu waxa ay waafaqi doonaan mawduucyada xog-ururinada jawaab-celinta ardayga iyo qoyska.

**Waa maxay jadwalka wakhtigu?**
Taariikhda bilawga ee hadda ee Xog-ururinta Dugsiyada Guulaystay waxa laga dhigay **Febraayo 8deeda**. Daaqadda xog-ururinta ardaygu waxa ay furnaan doontaa 2-3 toddobaad xog-ururinta qoyskuna waxa ay furnaan doontaa 3-4 toddobaad.

**Sidee baa ay ardayda, qoysaska, iyo shaqaaluhu u qaadan doonaan xog-ururinada?**
Dhammaan xog-ururinada ardayda waxa lagu maamuli doonaa onlayn, qarsoodi, lalamana xidhiidhinayo ardayda iyo macallimiinta. Shaqaalaha iyo hoggaamiyeyaasha ku salaysan dugsigu waxa ay ku heli doonaan xog-ururinta linki loogu soo diro iimaylkooga shaqada.

Qoysasku waxa ay ku qaadan doonaan xog-ururinta onlayn sidoo kale, laakiin xog-ururinada waraaqda ah waa laguu diyaarin doonaa marka aad u baahato. Dhammaan xog-ururinada waxa loo turjumi doonaa shanta luuqadood ee ay taageerto PPS: Isbaanish, Raashiyaan, Soomaali, Fiitnaamiis, iyo Jayniis.

**Maxaa looga baahan doonaa dugsiyada?**
Maamulada dugsiyadu waxa ay u baahan doonaan inay magacaabaan isu duwe xog-ururin kaas oo ku taageera maamulka xog-ururinta goobtooda. Xog-ururinada waxa lagu qaban doonaa elegtaroonig ahaan, sidaas darteed waxa uu u baahan doonaa isuduwid tiknoolaji. Xog-ururintu waa inay qaadato wax aan ka badnayn 20 daqiiqo si loo dhamaystiro. Maamulada waxa laga dalban doonaa inay wakhti siiyaan shaqaalaha si ay ugu qaataan xog-ururinta inta lagu gudo jiro shaqo maalmeedka, si walba ha noqotee waa la dhamaystiri karaa wakhti kasta inta lagu gudo jiro daaqadda xog-ururinta.

**Sidee ka qaybqaadashada loola socon doonaa?**
Yoolka ka qaybqaadashadu waxa weeyi 50% loogu talagalay xog-ururinta qoyska iyo ka qaybqaadasho 100% ah oo loogu talagalay ardayda, shaqaalaha, iyo hoggaamiyeyaasha. Tani waxa ay xaqiijin doontaa natiijooyinku inay ka turjumayaan ardaydeena iyo qoysaskeena. Qorshaynta & Hawlgudashada Nidaamku waxa uu siin doonaa cusboonaysiin toddobaadle ah oo ku saabsan heerarka jawaabta isu duwayaasha xog-ururinta iyo maamulayaasha dugsiyada.

**Sidee loo adeegsan doonaa loona wadaagi doonaa natiijooyinka?**
Xogahani waa kuwo joog u tax ah oo, marka lagu daro waxbarashada xirfadeed, gacan ka gaysan doonta wargelinta qorshaynta iyo horumarinta socota ee PPS. Hoggaanka PPS waxa uu fudaydin doonaa fursadaha horumarinta xirfadeed si loogu tababaro shaqaalaha sida loo adeegsado xogta. Natiijooyinku waxa ay diyaar noqon doonaan Badhtamaha Abriil, taas oo ka taageeri doonta heerka dugsiga iyo Degmada qorshaynta sanadka soo socda. Natiijooyinka waxaa lagu dhajin doonaa iyada oo loo marayo dashboard-ka khadka tooska ah. Maamulayaasha dugsiyada, shaqaalaha iyo kooxaha cimilada dugsiyadu waxa ay awood u lahaan doonaan inay adeegsadaan natiijooyinka xog-ururinta si ay ugala hadlaan qoysaska iyo shaqaalaha yoolalka sanad dugsiyeedka soo socda.